

HADDII AAD U BAAHAN TAHAY CAAWIMO

Xaalladaha khatarta ah wac **000**

Haddii gurigaaga ay si xun wax u gaareen aadana u baahan tahay caawimo, wac SES tel: **132 500**.

Tabaruc ka tirsan SES ayaa iman doona sida ugu dhaqsaha badan. Caawimada waxaa loo bixiyaa sida loo kala mudan yahay, fadlan sug oo dulqaado.

NADIIFINTA

- Bilaw inaad nadiifiso wareega gurigaaga – isku xirto waxyaallaha kala daadsan sida laamaha iyo haraaga meel ka fog mitirka biyaha, qalabka sahla jahada socodka dareeraha iyo laymanka telefoonka
- Wac dawlada hoose si aad u hesho talada ku saabsan qaadida qashinka cagaaran iyo waxyaallaha kale sida xirida ama wareejinta asbestos-ka

ADEEGYADA XAALLADAHA DEGDEGTA AH EE DAWLAD GOBOLEEDKA

Tabaruciinta FESA State Emergency Service (SES) waxay caawimaan bulshada Western Australia inta lagu jiro xilliyada dabaylaha iyo khataraha kale ee dabeecadu keentay iyo waxyaallaha degdegta ah.

Tabaruciinta SES waxay caawimaan bulshada iyaga oo:

- Samaynta dayactir ku meelgaar ah ee guryaha iyo ganacsiyada. Waa masuuliyadaada inaad qaban qaabiso dayactir rasmi ah. La xiriir shirkadaada caymiska
- Banaynta dhirta dhacday
- Badbaadinta dadka dhaawacmay ama dibinta galay
- Dhigida jawaana ciid ah meelaha khatarta ah oo fatahaya
- Caawinta dib u meelaynta dadka

Caawinta noocaan ahi badanaa waa ku yar tahay meelaha aadka ugu diyaargarooaba xilliga dabayla-roobeedka, taas ayaa ah sababta ay SES tabaruciinteedu sida firfircoon ugu caawimaan bulshada siyaallo hoos u dhigayaa saamaynta dabaylaha ku yeellan karaan noloshu iyo guryaha. Kooxdaan waxaa ka go'an taageerid mana qaataan lacag waxayna hureen waqtigeedu, badanaa iyaga oo u dhabar adaygaya qabow, qoyaan, dabaylo iyo xaallad aad khatar u ah si ay ugu gargaaraan boqolaa u baahan caawima dedeg ah.

Marka dabaylaha-roobeedka aadka u darani socdaan waxaa dhici karta telefoon dirid la xiriirta caawimada waxaana wax looga qabtaa telefoonada siday u kala mudan yihiin. Tabarucayaashu waxbay ka qabanayaan arrinta sida ugu dhaqsaha badan.

NAMBARADA XAALLADAHA DEGDEGTA AH

Booliiska, Dabdamiska, Ambalansida (xaalladaha khatarta ah)	000
Caawimada Adeega Xaalladaha degdegta ah ee Dawlad Goboleedka [State Emergency Service (SES) assistance]	132 500
Western Power	131 351
Horizon Power	132 351
Water Corporation	131 375
Xaalladaha gaaska ee degdegta iyo ciladaha ee Alinta	131 352

HELIDA MACLUUMAAD INTAAS KA BADAN

Websaytko FESA	www.fesa.gov.au
Khadka Talasiinta Digniinta Dabalayha ee BoM	1300 659 213
Saadaasha Dabaylaha iyo Hawada	www.bom.gov.au
Xaallada wadada (wadooyinka waaweyn ee WA)	138 138

Talo iyo macluumaad intaas ka badan waxaa laga heli karaa websaytko FESA iyaga oo ku qoran: Chin, Dinka, Farsi, Fiyatnaamiis, Mandarin, Carabi, Indonesiyani, Soomaali, Sawaaxili, Faransiis, Kantoniiis, Amxaarig, Nuer, Karen, Dari, Kirundi, Suudaaniis Carabi.
Booqo: www.fesa.wa.gov.au

Macluumaadka tusahani ka kooban yahay waxaa u bixisay Fire and Emergency Services Authority (FESA) si tabaruc ah adeeg dadweyne ahaan. Qoraalkaan waxaa loo diyaariyey si mukhlisnimo ah waxaana laga soo qaatay macluumaad la aaminsan yahay inuu sax ahaa waqtiga la daabacay. Si kasta ha ahaatee, ku tashiga iyo saxnimada macluumaadka ma ballan qaadi karto hay'ada FESA waxayna si cad meesha uga saaraysaa fal kasta oo la qabtay ama laga tegay ama aan la samayn iyada oo lagu tashanayo macluumaadka iyo wixii ka yimaada, ama toos ha ahaadeen ama yaanay ahaane, oo ka imanaya ficilka la qabtay ama laga tegay. Qoraalka waxaa looga jeedaa in uu ahaado tuse akhristayaashuna waa inay helaan talo madaxbanaan ayna sameeyaan waxweydiinta loo baahan yahay. April 2010

FESA

FESA House, 480 Hay Street Perth, Western Australia 6000
GPO Box P1174, PERTH WA 6844

Telefoon: +61 8 9323 9300 Fakis: +61 8 9323 9384

Email: fesa@fesa.wa.gov.au

Websaytko: www.fesa.wa.gov.au

U DIYAARGARAWGA DABAYLA-ROOBEEDKA XILLIGA DABAYLAHA



Government of Western Australia
Fire & Emergency Services Authority



XILLIGA DABAYLAHA

Dabayla-roobeedku waxaa laga yaabaa inay keenaan roobab xoogan, dabayl wax kharibaysa, hanqar, baraf, duufaano iyo nooc duufaan ah oo xoogan oo ku socota qaybta koonfureed ee Western Australia inta u dhexaysa May iyo Oktoobar sanad walba. Si kasta ha ahaatee dabayla-roobeedku waxay dhici karaan bilaha diiran sidaas darteed waa muhiim inaad diyaar u noqoto sanada oo dhan.

WAA MAXAY DABAYLA-ROOBEEEDKU?

Dabayla-roobeedku waxay abuurmaan marka diirimaad, hawo qoyan oo dhulka u dhow kor degdeg ugu riixdo jawi aan deganayn.

MAXAAD UGU DIYAARGAROOBAYSAA DABALAYLA-ROOBEEEDKA?

Dabayla-roobeedka khasaaraha geysanaya, duufaano qarxaya, hanqaro, baraf iyo duufaanta xoogan waxay u geysan karaan khasaare gaara guriga, baabuurta iyo bay'ada. Xataa waxay keeni karaan dhaawac iyo khasaara nafeed.

Dabaylaha khasaarada guriga ku keena badankood waxay ka yimadaan:

- finin iyo waxyaalla ka soo fuqay aqalka korkiisa
- dhir soo jabtay iyo laamoh
- daadad ka yimid meela xirmay iyo tuubooyinka kor ka yimaada

Dadku waxay ahaan karaan amaan waxayna hoos u dhigi karaan khasaarada gaarta guriga iyaga oo u diyaargarooba.

SIDA LAGU DIYAARGAROOBO

Ka dhigida gurigaaga iyo qoyskaaga iyo diyaar u noqoshada dabaysha-roobku waa masuuliyadaada. Haddii aad ku nooshahay meel dabaysha u nugul, waa inaad mudnaanta siisaa inta u dhexaysa Maarso iyo May si aad uga diyaariso gurigaaga gudoh iyo dibadba. Waxaa jira dhowr talaabo oo sahlan oo la qaadayo kuwaas oo kaa caawimi kara hoos u dhigida khasaaraha:

- Hubi saqafkaaga iyo meelaha biyuhu mareenka wax khariban ama waxyaalla daadsan
- Ka banaynta biyamareenka iyo tuubooyinka hoos u jeeda cagaarka xiraya
- Gaabinta laamaha gurigaaga ku dhow iyo hawl gelinta shaqaale si ay kaaga qaadaan dhirta iyo fiilooyinka korontada
- Ka banaynta qashinka deyrkaaga, baalkoniga iyo fogaynta wax kasta oo daadsan
- Diyaari kitka xaalladaha degdgeta ah sida raadiyo la qaadi karo, tooj, batteri kayd ah, kitka gargaarka kowaad iyo qorshaha qoyska ee xaalladaha degdegta ah
- Xaqiiji in qoyskaagu fahmaan dabaylaha-roobka iyo khatartooda
- Diyaari qorshaha degdegta ah oo ay ku jiraan qorshaha meelaynta haddii gurigaaga daad la tago. Ka feker waxaad ka yeeli doonto

xayawaankaaga iyo sida loo damiyo gaaska, korontada iyo biyaha (eeg websaytka FESA macluumaad intaas ka badan)

- Ku muuji liiska nambarada telefoonada xaalladaha degdgeta ah
- Hubi inaad leedahay caymiska alaabta iyo guriga ee ku haboon

DIGNIINAHA HAWADA

Joogto ayaad ugala socon kartaa digniintii iyo taladii ugu dambaysay ee dabaylaha:

- wararka raadiyaha, Telefishanka iyo wararka online-ka ah
- websaytka FESA ee www.fesa.wa.gov.au
- websaytka Hay'ada saadaasha Hawada: www.bom.gov.au – ama adiga oo wacaya Digniinta Hawada Dhulka iyo Khadka Talada Digniinta Daadadka khadka talada oo ah **1300 659 213**

MARKA DABAYLA-ROOBEEEDKA LA SAADAALIYO

- Adkay ama meesha ka saar wixii debeccsan iyo qashinka gurigaaga agtiisa ah ama shaqada sababtoo ah wixii dabecsan dabaysha ayaa ka dhigi karta waxyaalla dhibaato keenaya
- Yaray wixii debeccsan adigoo isticmalaya bacda balaastikda ah oo laga buuxiyey ciid, halkii aad isticmaali lahayd dabayl xoog leh
- Xaqiiji in kitka xaalladaha degdegta ah la cusboonaysiiyo
- Xaqiiji in maribada iyo xayawaanku ay joogaan meel amaana
- Gey gaarigaaga meel daboolan
- Haddii aad ka fogtahay guriga waa inaad la xiriirtaa qoyskaaga ama saaxiibadaa si aad u xaqiijiso in gurigaagu amaan yahay
- Shaqaalaha goobta dhismuhu waa inay dhigaan qalabka dhismaha hooso amaana ah
- Dadka doonyaha leh waa inay xaqiijiyaan in doonyahooda si amaana loo xiray
- Dadka dibadaha baadiyaha ah nasashada u joogaa waa inay helaan meel kale oo ay galaan

Cuntada khaaska ah iyo daawada oo laga yaabo in ay u baahan yihiin carruurta, dadka waaweyn ama kuwa liinta leh iyo xubnaha qoysku

KITKA XAALLADHA DEGDGETA AH

Dukuminiti muhiima oo boorso ku xiran

Tooj

Galoofis adag

Kitka Gargaarka degdegta ah

Raadiye la qaadi karo

Caanaha la qaso oo ilmaha

Batteri kayd ah

Cuntada aan sahalka u xumaan

Boorsooyinka aan biyuhu gelin



MARKA DABAYLA-ROOBEEEDKU DHACAYAAN

- Xir daahyadaada gudahana joog kana fogow daaqadaha
- Hadday kugu qabsato banaanka hel meel amaana kana fogow dhirta, fiilooyinka korontada, waxyaallaha birta ka samaysan, meelaha biyuhu maraan, webiyda iyo biyamareenada
- Haddii aad doon wadato, dabaalanaysa, ka bax biyaha
- Haddii hanqar jiro, ka saar qalabka korontada hana isticmaalin telefoonka dhulka yaal
- Haddii ay jiraan daadad waxaad abuuri kartaa jawaano ciid ah adiga oo isticmaalaya baco balaastik ah ama galalka barkimooyinka oo ciid laga buuxiyey
- Haddii aad wado gaari qaad weyn siyaada uga taxadar wadada:
 - tartiib u soco, dami nalkaaga kana fogow dareewalada kale
 - Haddii aadan arki karin, jooji gaariga oo dhig iyada oo nalka khatarta sheegaa daaran yahay ilaa roobku istaago
 - Ha ku wadin gaariga biyo aadan ogeyn inta dhererkoodu le'eg yahay oo socda

DABAYLAHA-ROOBEEEDKA KA DIB

- Ka eeg gurigaaga iyo hantidaada wax gaaray
- Eeg saaxiibadaa iyo deriskaaga haddii ay u baahan yihiin caawimo
- Ka fogay carruurtaada daadadka, webiyada, biyaha socoda iyo biya mareenka
- Iska ilaali fiilooyinka korontada oo soo dhacay maadama ay khatar yihiin mar walbana waa in loo qaataa in korontadu nooshahay
- Ka taxadar dhirta soo dhacday iyo dhismayaasha khatarta ah
- Haddii aad gaari wado tartiib u soco, ka fogow dareewalada kale kana taxadar meelaha daadku qaaday
- Haddii wadooyinka daad qaaday ha ku wadin wadada dhexdeeda taas oo aan la ogeyn inta dhererka biyuhu jiraan
- Ka fogow wadooyinka jayga leh maadama wadada dusheedu lagu siibanayo dhooqana tahay, baabuurta geli karaa dhooqada

